Dadka cadaalada ku dhaqma Ilaahay agtiisa ayey ku fadhiyaan Minbaro Nuur ah, kaasoo ah Midigta Ilaahay Casa Wajala, iyadoo labadiisa Gacmoodba ay Midig

Cabdulaahi Binu Camar Allaha ka raali ahaado isaga iyo Aabihiye waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Dadka cadaalada ku dhaqma Ilaahay agtiisa ayey ku fadhiyaan Minbaro Nuur ah, kaasoo ah Midigta Ilaahay Casa Wajala, iyadoo labadiisa Gacmoodba ay Midig yihiin, dadkaasu waa kuwa cadaalada ku suubiya Xugunkooda, Reerkooda iyo cidii ay masuulka ka yihiinba.
[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay kuwa dadka ay Maamulaan iyo Eheladoodaba cadaalad iyo xaqa ku xukuma, waxay ku fariisanayaan Kuraas dhaa-dheer oo Nuur ka samaysan, oo iyaga lagu maamuusayo Maalinta Qiyaamaha. Minbaradaas waxay yaalaan Allaha Raxmaanka ah Midigtiisa, Isagoo labadiisa Gacmoodba-Isagaa nusqaan ka hufane- ay Midig yihiin.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/4935